**Macluumaad ku saabsan nidaam rasiid-bixin ah oo tijaabo ah**

(*Macluumaadkan waa la cusboonaysiin doonaa waxaana loo turjumay luuqado kale.)*

Booliska Oslo ayaa sanadka 2022 ay Wasaaradda Cadaaladda iyo Heeganku u xilsaartay in ay bilaabaan mashruuc tijaabo ah oo ku saabsan rasiid-bixin:

*"Sanadka 2022 waxaa booliska Oslo bilaabayaa mashruuc tijaabo ah oo lagu tijaabinayo farsamo qofka lagu siin karo looguna samayn karo caddayn ku saabsan in boolisku uu kantaroolay. Waxqabadkani wuxuu ka mid noqonayaa tallaabooyinka kale ee ku saabsan kor u qaadista kalsoonida lagu qabo booliska iyo kantaroollada boolisku ku sameeyo dadka. Degmada Oslo, ururada iyo cidda kale ee ay khusayso ba waa in laga soo qaybgeliyo hawshan. Mashruucan tijaabada ah waxaa lagu samayn doonaa dib-u-qiimayn." (Wasaaradda Cadaaladda iyo Heegaanka, 2022)"*

**NIDAAMKA TIJAABADA AH**

Booliska Oslo ayaa bilaabay nidaam tijaabo ah oo rasiid la siinayo qofka uu boolisku joojiyo ee la kantaroolo. Nidaamka waxaa la tijaabin doonaa muddo sagaal bilood ah, 5.12.22 - 3.9.23.

Booliska Oslo ayaa muddo dheer xoogga saarayay horumarinta sida aanu dadka ula kulanno oo aanu u samayno kantaroollada dadka. La kulanka boolisku waa inuu noqdo sida ugu wacan ee suurtagalka ah, iyadoo aanay ku xidhnayn waxa kulanku ku saabsan yahay.

Boolisku wuxuu fuliyay tallaabooyin dhowr ah, shaqaaluhuna waxay soo mareen barnaamij tababar ah.

Nidaam tijaabo ah oo rasiid la bixinayo marka qof la kantaroolo ayaa ah mid ka mid ah tallaabooyinka la tijaabinayo si kor loogu qaado kalsoonida ay dadweynuhu ku qabaan booliiska.

**Ujeedada**

Ujeedada nidaamkan tijaabada ah waa in la helo aqoon ku saabsan sida nidaamka rasiid-bixintu u shaqayn karo, sida nidaamku u saamaynayo kalsoonida lagu qabo booliiska, iyo sida uu u saamayn karo hababka shaqada ee booliiska.

Kantaroolida dadku waa farsamo muhiim u ah shaqada booliiska. In kasta oo ay lagama maarmaan tahay oo islamarkaana ay sharci tahay, haddana

qaar ka mid ah dadka la kantaroolo ayaa u arki kara inay tahay culays aan caddaalad ahayn.

Nidaamka tijaabada ahi wuxuu hay'adda siinayaa aqoon-korodhsi ku saabsan kantaroolida dadka, iyo xog gundhig u noqon karta go'aan ku saabsan in mustaqbalka la hirgeliyo nidaam rasiid-bixin ah.

Degmada Oslo, OMOD, Ururka Qareennada Norway (Juristforbundet), Minotenk iyo cidda kale ee ay khusayso waa laga talageliyay hawsha.

Nidaamka tijaabada ah waxa lagu samayn doonaa dib-u-qiimayn.

**Yaa la siinayaa rasiid?**
Muddada tijaabada ah waxaa rasiid la siinayaa dadka jooga aag weyn oo ka mid ah suuqa Oslo (eeg khariidad) ee ay booliisku joojiyaan oo ay kantaroolaan.

Waxaa nidaamka tijaabada ah ka qaybgalaya saraakiil ka tirsan Qaybta suuqa, qaybta ajaanibka iyo qaybta UEH. Shaqaalaha kale ee ka shaqaynaya aagaasi ma bixinayaan rasiid.

**Waa maxay kantaroolida dadku?**
Kantaroolida dadku waa kulannada boolisku dadweynaha kula yeesho goobaha dadweynaha ee u baahan in loo cuskado xeer, xeer-nidaamiye ama tilmaamo dawladeed.

Joojinta iyo baadhista – xeerka booliska § 7
https://lovdata.no/dokument/NL/lov/1995-08-04-53

Kormeerista hubka ee ku salaysan xeerka booliska § 7a
https://lovdata.no/dokument/NL/lov/1995-08-04-53

Kormeerista ammaanka – xeerka booliska §10
https://lovdata.no/dokument/NL/lov/1995-08-04-53

Kantaroolida gaadiidka – xeerka marista wadooyinka §10
https://lovdata.no/dokument/NL/lov/1965-06-18-4

Hubinta xogta shakhsiga – xeerka ciqaabta §162
https://lovdata.no/dokument/NL/lov/2005-05-20-28/*

Kantaroolida ajaanibka – xeerka ajaanibka §21
https://lovdata.no/dokument/NL/lov/2008-05-15-35

**La kulannada booliska ee aan rasiid la bixinayn**

- Wadahadallada ikhtiyaariga ah iyo la kulanka dadweynaha ee kale
- Kantaroolida gaadiidka ee hore loo sii qorsheeyay
- Tallaabooyinka dad badan khuseeya ee ku salaysan xeerka booliska (tusaale ahaan in ldad meel ku ururay la kala diro)
- Kantaroolka xuduudda
- Dhacdooyinka dadka la badbaadinayo, tusaale ahaan meel gubatay

**Maxaa dhacaya markaan helo rasiid?**
Waa ikhtiyaari in la qaato rasiidka, laakiin booliisku waxay qoran doonaan magacaaga iyo taariikhda dhalashada. Waa waajib inaad boliiska siiso xogtaas,sida uu dhigayo xeerka ciqaabta § 162. Xogta waxaa la gelinayaa diiwaan loo isticmaalayo nidaamka tijaabada ah oo kaliya, oo muujinaya in lagu kantaroolay. Ma jirto wax cawaaqib ah oo ka dhalanaya in rasiid la qaato.

Rasiidka aad helayso waxaa ku qornaan doona xog ka kooban magaca, taariikhda dhalashada, wakhtiga iyo goobta + xeerka kantaroolidu ku salaysan tahay. Intaa waxaa dheer, macluumaad ku saabsan sarkaalka (lambarka sarkaalka) kantaroolka sameeyay.

Rasiidku wuxuu sidoo kale ka kooban yahay warbixin kooban oo ku saabsan nidaamka, iyo waxa qofka la kantaroolay samayn karo hadii uu rabo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan kantaroolka, fursadda cabashada ee jirta iwm.

**Halkee ayaad rasiid helaysaa?**
Muddada tijaabada ah waxaa rasiid la siinayaa dadka jooga aaggan ka tirsan suuqa Oslo:

Tijaabadu waxay ka dhacayaa aagga u dhexeeya E6 ilaa RV150, RV150 ilaa RV4, RV4 ilaa Ring 2, laga bilaabo Ring 2 - Sognsveien, Thereses gate iyo Pilestredet ilaa RV162, iyo laga bilaabo RV162 ilaa E6. (eg khariidad)

**La xidhiidhka booliska**
Haddii aad rabtid faahfaahin ku saabsan nidaamka tijaabada ah, aad qabtid su’aalo guud oo ku saabsan kantaroolka, sababta kantaroolka ama wax kale, halkan ayaad kala xidhiidhi kartaa: post.oslo@politiet.no , ama soo wac telefoonka 02800.

Ma rabtaa inaad cabasho u soo dirtid booliska – isticmaal e-boosta:

[post.oslo@politiet.no](mailto:post.oslo@politiet.no)

Macluumaadkan waa la cusboonaysiin doonaa waxaana loo turjumayaa luuqado kale.

